

G/Bari

FAAFINTA

RASMIGA



الرسمية

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 3<sup>aad</sup>

Garoowe,

:27/6/

2001

Lam. 6

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntaland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.Rukunka Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka  
gudihusa.dibaddana waa Sh.So.500.000-Rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka  
bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii bidaar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000  
Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa  
lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Labaad

Sharci.

Waxba Ma leh.

Qaybta Labaad


Xeer



Qaybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Wax ka bedel, Axdiga P/Land

Waxba ma leh.



DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Xeer Lam 2

27/6/2001

Kuna saabsan wax ka bedelidda Golaha Wakiillada wax ka bedelay qodobo ka mid ah Axdiga Dawladda Puntland,

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY Axdiga Dawladda Puntland,

MARKUU TIXGELIYEEY Ansixinta wax ka bedelka Golaha Wakiillada ku sameeyey qodobada Axdiga ee 8.4, 12.1 iyo 28.4, iyadoo Goluhu waafajiyey sida uu qabo ama qeexayo qodobka 35.1 ee Axdiga Dawlad Goboleedka Puntland, sida ku cad warqadda ansixinta wax ka bedelidaas ee summadeedu tahay GW/64/DGPS/2001 ee 27/06/2001,

### WUXUU SOO SAARAY:

Xeerka wax ka bedelidda ee soo socda:

#### Qodobka 1<sup>aad</sup>


Wax ka bedelidan Axdiga Puntland 2001<sup>da</sup> ee Dawladda Puntland waa la ansixiyey.

#### Qodobka 2<sup>aad</sup>

Seddex nuqul oo wax ka bedelidan Axdiga Puntland ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa Asal (Original), waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Xoghaynta Madaxweynaha hal nuqul, Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul iyo Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada hal nuqul.

#### Qodobka 3<sup>aad</sup>

Xeerkan wax ka bedelidda Axdiga Puntland wuxuu dhaqan gelayaa maalinta Madaxweynuhu saxiixo, ka dibna waxaa lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Puntland, qofkastana waxaa ku waajib ah in uu dhawro wax ka bedelka Axdiga kuna dhaqmo.

  
Cabdullaahi Yuusuf Axmed  
Madaxweynaha Dawladda



# بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

DAWLAD G. PUNTLAND  
EE SOOMAALIY  
Golaha Wakiillada



PUNTLAND STATE  
OF SOMALIA  
Representative Council

Ref. GWDGPS/65/2001

Date\_27/06/2001

Golaha Wakiillada.

Markuu arkay, Qodobka 8.1 ee axdiga ee siinaya awoodda xeer-dejinta Dalka.

Markuu arkay, Qodobka 35.1 ee Axdiga oo siinaya awoodda wax ka bedelidda Axdiga

Wuxuu beddeley Qodobada soo socda:-

1. Qodobka 28.4 wuxuu u bedelmay sidan:-
  - B) Axdiga waxaa bedelayaa dastuurka cusub ee Golaha wakiillada ansixiyeen 9/06/2001, wuxuuna dhaqan gelayaa 01/07/2001.
    - I) Dastuurka waxaa loogu dhaqmayaa si ku meel gaar ah inta afti Dadweyne loo qadayo.
    - J) Waqtiga Dastuurka afti Dadweyne loo qadayo waxaa ka go'aan qaadanaya Golaha wakiillada.
2. Qodobka 8.4. wuxuu u bedelmay sida soo socota:-

“Muddada xilka Golaha wakiillad waxaa la dheereeyey Saddex Sano oo ka bilaabata 01/07/2001 iyadoo markii hore ku ekeyd 30/06/2001 wuxuuna yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadyada uu dastuurku siinayo”
3. Qodobka 12.1 wuxuu u bedelmay sida soo socota:-

“Mudada xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Kuxigeenka waxaa la dheereeyey 3 Sano oo ka bilaabata 01/07/2001 iyadoo markii hore ku ekeyd 30/06/2001 waxayna yeelanayaan awoodaha iyo waajibaadyada uu Dastuurku siinayo”

Yuusuf X. Saciid  
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada

